# Warbixin Kooban Ee Fulinta

## Qoraal-Qabyeedka Qorshaha Sanadlaha ee Socod-Hawleedka 2018

*Sanad xisaabeedka bilaabanaya Janaayo 1, 2018*

## Waayo Cusub, Xoog-saarid Hawsha-Hadafkeena

Sanadka 2018 wuxuu u noqon doonaa Hay'adda Guryenta Dadweynaha ee Miniyabolis (MPHA) taariikhdeeda mid isbedel weyn leh. Kadib markii aan sanadihii dhawaa aan xooga saarney horumarin xasilooni iyo dhexdheexaad leh, MPHA hada waxey si go'aan leh ugu jiheysaneysaa dhisida aassaaska guryeynta mudada dheer la sii wadi karo iyo dhaqaale wanaagga degeneyaasha iyo ka qaybgalayaasha. Natiijadda isla markiiba ahna, waxey noqon heer waxqab leh iyo hore-u-socod fursad awoodeed taasoo soo jiidaneyso in ay hawlgaliso bulshada. Mudo dheer, waxey, had iyo jeer MPHA isku taxaluujisaa sidii ay ku abuuri lahayd guryo badan oo kiradooda la awoodi karo iyo fursado qoysaska caruurta leh, dadka waayeelka meel ay ku gaboobi karaan, iyo degeneyaalka itaalka gabay ama naafada ah, iyo qoysaska qaxootiga ama muhaajiriinta damacsan in ay dhistaan oo dhawrtaan bulsho.

In kastoo ay jirto guusheena, MPHA, si la mid ah mas'uuliyiinta guryeynta dadweynaha wadanka oo dhan, waxey ku shaqeysaa cadaadis miisaaniyadeen oo xoogleh.

**HAWSHEENA HADAFKEEDU WAA**

*Si kor loogu qaado,loona hirgaliyo guryo tayo leh ,si fiican loo-maamuley dadka kala duwan oo dakhligooda yar yahay Iyo, in wada jir wax uga geysano horu-marinta shaqsiyaadka, qoysaska iyo bulshada aan u adeegno.*

Hay'adda Guryeynta Dadweynaha waxaa loo qasdey in ku shaqeyso qoondo maalgelineed ee dawlada dhehe (Federal). Kaabayaasha waa la dhisey, qoysas guryo waa la dejiyey, foojarka dadka meesheen rabeen ay ku degi karaan waa la qaybiyey. Filashooyin ama rajooyin waa la abuurey. Haddana in kaban tobanaan sano oo miisaaniyada Golaha Ummadaa (Kongareska), waxey iska noqotey "wax caadi ah oo cusub" in lagu shaqeeyo lacag miisaaniyadeed la qoondeeyey oo aan ku filnayn hay'addaha guryaha. Maamulka hada jirana waxay soo jeediyaan kharash dhimis aad u adeg, xataa markii loo barbardhigo hoos u dhici waagii hore.

Sidoo kale guryaheenana way sii duqoobayaan. Dadweynaha degeneyaalkeenana da'dooda way sii weynaaneysaa, qaarkood waxeyna la xarbinayaan caqabadaha caafimaadka maskaxda, iyo naafo kale, waxeyna wajahaan caqabadooyin cusub, dadka muhaajiriinta ama soo galootida ah iyo qaxootiga waxey wajahaan caqabdo. Qoysaska haysta foojarka sekshan-aytka (Section 8) lala guurguuri karo ayaa marar badan la kulmey xaaladaha in ay ku aruursanadaan xaafado dhib iyaga ama caruurtooda u keena, sidii ay oga bixi lahaayeen barnaamijka ama faqriga. Dhanka kale kumanaan kun oo ku jira liiska sugitaanka guryaha wuxuu keenaa baahi daboolid la'aan aan caadi ahayn.

Ayada oo ay jirto xaaladaan, waa in aynu helnaa habab cusub oo hal abuurleh si aan ugu adeegno qoysaskeena haatan iyo qoysaska la hubo in ay inoo baahnaan doonaan mustaqbalka. Sanadka 2018, MPHA waxay aassaaska u dhigeysaa gur'yeyta dadweynaha iyadoo xoogga aad loo saari doono dhawrida dhismayaasheena. Tani waxay ka bilaabaneysaa oo ku dhamaaneysaa dhawrida ama difaacida dadka halkaan ku nool iyada oo loo marayo *Mabaadi'da Hageysa Dib-U-Horumarinta iyo Maalgashiga Hantida* taasoo hubineysa xuquuqda degeneyaalka.

Dukumeentigaan ama warqadaan rasmiga ah, oo lagu qorey iskaashi degeneyaalka, waxaa ansixiyey guddiga golaha sare ee Hay'adda Guryeynta, waxaa lagu bandhigey shan luuqadood, wuxuu ballanqaadayaa dukementigaas, ka qaybgalka degeneyaalka, xuquuq-ku-soo-noqosho ah, kiro xasillan, iyo difaacida dadweynaha nugul oo aan u adeegno. Iyada oo taasi ay inoo tahay muhiimada aan ka ambaqaadayno, ayaan waxaan $1 (hal) milyan oo doolar oo ah sanduuqa lacag miisaaniyeedka lagu shaqeeya, iyo baaraan-deg/ama baarid qoto dheer leh ee hantideena kala duwan, waxey noo ogalaaneysaa in aan sanadka 2018 bilowno hanaan maalgelinta la beegsadey si aan ku dhawro guryeynteena.

Isticmaalida waraaqaha foojarka ee Guryeynta (xataa loo yaqaan "sekshan 8"), MPHA waxey dhidibada u dhigeysaa aasaaska fursado dhaqaale. Hadii lagu adeego, miisaaniyadda dawladda dhexe ee haatan, ma keeni karno qoysas cusub barnaamijka anaga oo bixinayna foojarka cusub. Laakiin waxaan awoodnaa-marka loo fiiriyo waagii hore-in aan abuurno wadiiqooyin cusub ay qoysasku ku raadsan karaan guul iyo fursado dhaqaale. Hal qayb oo aragtidaas ah waa barnaamijka loo yaqaan (Mobility) ama Dhaqdhaqaaqa: oo ah siinta qoysaska door ama kaalin xulasho ah oo badan oo fiican oo ah xaga xaafadaha ay degeyaan, iskuulada ama tayada isku dhafka guryaha ay dooranayaan in ay ku degaan foojarka. Qaybta kale waa fursad waxbarasho ah iyo tababarka, taas oo abuureysa iskaashi xeeladeysan taasoo ah guryeyn iyo farsamado kale si loo gaaro iskufilnaasho. Haddii si sax ah loo sameeyo, maalgelitaan waa in ay abuurtaa ficil wanaagsan oo wareeg ah ama soo noqnoqda: Qoysaska hada waxey helayaan guul iyo qaab ay kaga kaaftoomaan ama kaga baxaan barnaamijka, caruurtoodana waxey la kulmayaan fursad yaraanta ayba ugu baahdaanba ama kaga kaaftoomaan. Tani waxey fursado u furi kartaa qoysaska mustaqbalka u baahda caawimaad iyagana.

Qorshaha sanadlaha ee MPHA wuxuu tusmeenayaa ama taxayaa aragtideena iyo tilaabooyinka mucayinka ah ee sanad xisaabeedka ee xiga ee bilaabanayana Janaayo 1, 2018. Qorshuhu xataa wuxuu tusmeenayaa sida MPHA u istimaaleyso farsamo muhiim ah si ay u hirgalaan. Farsamadaan waxaa la yiraahdaa barnaamijka socod-hawleedka (MTW) ama u dhaqaaqa hawleedka socodka.

## Baraamijka Socod-Hawleedka: Waa Farsamadda Xalka Deegaanka

Sanadkii 2008, Wasaarada Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD), waxey siisey MPHA heerka buuxa ee "Socod-Hawleedka" (MTW). Tani waa arin muhiim ah sababtoo ah barnaamijka MTW wuxuu siinayaa MPHA dabacsanaanta loo baahnaa si looga gudbo cadaadiska qoondada miisaaniyadda iyo loona nashqadeeyo barnaamijyo la qabsan karo baahideena iyo mudnaanteena, noona ogalaanayo in aan si fiican ugu addeegno degeneyaasha magaaladeena. MPHA waxey ka mid tahay 39-ka mas'uuliyiinta Hay'addaha Guryeynta Dadwaynaha ee Mareykanka kuwaasoo la siiyey heerka MTW.

Golaha Ummadda (Kongareeska) ayaa sameeyey barnaamijka Muujinta Socod-Hawleedka sanadkii 1996 sidii barnaamijku ugu o ogalaado Hay'adda Guryeynta in ay nashqadeeyaan oona tijaabiyaan xeelado cusub oo dadka degeenka la imaadaan si loo siiyo qoysaska daqligoodu-yar-yahay guryeyn kiradooda la awoodi karo. MTW waxey u ogalaaneysaa in waakaaladuhu laga daayo badanaa xeerarka HUD, waana haddii ay wakaaladu buuxiso ugu yaraan mid ka mid sadaxda ujeedooyinka qaanuunka qoran: (1) Kordhinta xulashooyinka guryeynta, (2) abuurida fursadooyin qoysaska caruurta leh ay ku noqdaan kuwo isku filan, iyo (3) kordhinta qiimeynta kharash waxtarleh ee wakaaladaha.

Si loo haysto heerka MTW, HUD waxey xataa kaga baahan tahay MPHA in dhamaystirto qorshe sanadeed tasoo MPHA ay ku sharxeyso wadooyiinka ay MPHA ku damacsan tahay isticmaalka heerka MTW iyo wixii ka baxsan barnaamijyada heerka caadiga ah ee HUD. Qorshaan waa in uu wataa fiiro faahfaahsan ee barnaamijyada, hawlgalada iyo maalgelinta weyn ee hantida ee Hay'adda Guryeynta, wixii waxqabad cusub ah ay MPHA jeclaan

lahayn in sii wado sanadka soo socda. HUD waxey rabtaa 30 cisho oo ah xili dadku ay ku sameyn karaan dib-u-eegis iyo faallo bixin dadweynaha, dhageysi dadweyne, iyo ansixinta guddiga golaha sare kahor inta aan loo gudbin HUD qorshe sanadeedka MTW ee MPHA.



In kastoo Qorshe sanadeedka MTW uu yahay dukumiinti loo diyaariyo HUD, hadana MPHA waxey u isticmaashaa hanaanka qorsheynta sanadlaha fursad ay degeneyaalka, ka qaybgalayaasha, iyo dadka daneeyeyaasha kale ee bulshada ay cod ahaan ku dhiibtaan walaacooda ama cabashadooda, iyo haddii su'aalaha ay ka qabaan MPHA. MPHA waxey buuxisaa oo inta laga rabey ka kormartaa sharuudaha HUD iyadoo oo jadwalka ku darsata soo bandhig dadweyne oo dhawr ah oo ay u qabato degeneyaalka iyo ka qaybgalayaasha barnaamijyadeeda, iyadoo, sanadkan, siineysa in ka badan 60 maalmood oo ah faallo dhibashada.

## Xaqiiqda ku saabsan Barnaamijyada MPHA iyo Caawimaada Guryeynta

Hay'adda Guryeynta Dadwaynaha ee Miniyabolis (MPHA) waxey leedahay oo maamushaa in kabadan 6,000 oo cutubyo guryeynta dadweynaha waxeyna maamushaa 5,000 foojarka guryeynta, waxeyna siisaa in ka badan 26,000 oo dadka ka mid ah bulshooyinka Miniyabolis gureyn kiradooda la awoodi karo, ammaan ah, oo lagu noolaan karo.

MPHA waxey siisaa guryeyn in kabadan 6,000 qoys (9,300 oo dadka ah) ee **Barnaamjka Guryeynta Dadweynaha**. Qaabkaan soo jireenka ah, qoysaska badankood ee caawimaadka ka hela MPHA waxaa daqli ahaan soo gala in ka yar 30 boqolkiiba daqliga dhexe ee meeshaas ay ku nool yihiin (AMI) ama $27,100 oo dolar (qoyskii afar ka kooban). Qoysaskuna kuma bixiyaan in kabadan 30 boolkiiba daqliga soo gala kiradooda-haddii ay shaqeynayaa ama ku nool yihiiin daqli go'an. In kastoo guryaha badankood ay yihiin dabaqyadda saraha dhaadheer, xataa MPHA waxey leedahay oo ku shaqeysaa guryo qoyseed hal halka ah/ labo-labada ah/ afarta afarta ah ee magaalada oo dhan iyo labo horumarinta u dhisian Guryo-Magaleedka. MPHA xataa waxey qandaraas lagashaa iskaashato si loo bixiyo adeega caawinta la noolashaha (assisted-living) iyo taxadarka dadka u baahan daryeelka xasuusta (memory care) ee labo xarumaheeda ah.

| 6,000 Cutubyo Guryeynta Dadweynaha ay Degenyihiin 9,300 Degenayaal ah | |
|---|---|
| **5,000** cutubyada guryo ku yaal **42** saraha dhaadheer abaartimantiyada dhismayaasha waa weyn ee dabakhyada ah ay ka mid tahay 12 dhisme loo qoondeeyey dadka waayeelka ah | **36%** Waa degeneyaal dadka waayeelka ah |
| **730** "Guryo goobaha magaalada ku firirsan" (guryaha qoyseedka hal-halka ah, labo-labadda ah, ama afarta-afarta) oo Miniyabolis ku oo dhan kuyaal | **25%** waa ilmo caruur ah |
| **15** Oo ah Guryo-magaleedka lagu kireysto-si-loo-milkiyo ee kuyaal (Heritage Park) | **41%** Waa dad naafo/itaal-la'aan ah |
| **184** Cutubyo Guryo-Magaaleedka qoysaska ee (Glendale) | **50%** Waa degeneyaal sheega wadanka ay asal ahaan ka imaadeen in uu yahay meel ka baxsan Mareykanka |
| **312** Cutubyada Guryeynta Dadwaynaha oo qayb ka ah horumarinta Barnaamijka Fursada Guryeyna ee Gobolka (MHOP) | **22%** Waxey sheegen in ay tahay luuqada asalka ah ay ku hadlaan Soomaali |
| | **71%** Xubnaha qoysaskooda waxey kasbadaan daqli |
| | **$14,300** Waa celceliska daqliga dhamaan xubnaha qoysaska; Xubnaha kuwa shaqeyana waa, **$20,900**. |

Barnaamijka waraaqaha foojarka ee Guryeynta ee MPHA (HCV, oo badanaa loogu tixraaco “sekshan 8”), qoysaska u qalma waxey helaan foojar loo isticmaalo karo si loogu bixiyo qayb ka mid kiradooda guri ama abaartimenti oo gaar loo leeyahay. Qoysaska waxey ku bixiyaan celcelis ahaan 30 boqolkiiba daqligooda dhanka kiradooda iyo addeegyadda, MPHA waxey bixisaa inta ka dhiban. Qoysaska waxey dooran karaan ku isticmaalka foojarka meesha ay ka rabaan magaalada gudaheeda amase dibada magaalada. MPHA waxey maamushaa in ka badan 5,000 oo foojar, ay ka mid foojaradda qaaska u ah dadka ciidamadda ka soo shaqeeyey, qoysaska ay haysato gur la’aanta ama dib jirka ah.
Dhammaan barnaamijkeeda Foojarada Guriga Ku Saleysan (PBV) oo aan lala guurguuri karin, MPHA waxey siisaa caawin kirada ah qoysaska daqligoodu yarhaya oo ku nool abaartimentiyada si gaar ah loo leeyahay. Iyada oo isticmaaleysa maalgelinta foojarka, MPHA waxey qandaraas la gashaa milkilayaasha guryaha si ay u hubiso guryahaan loo dhawray in ay ahaadan guryo kiradooda la awoodi karo ilaa 20 sano.

| 5,000 oo Foojarada Xulashada Guryeynta oo ay Haystaan 17,000 oo dad ah | |
|---|---|
| **4,694** Foojarka Xulashada guryeynta ay ka mid tahay:<br>**712** Foojarka Guryaha ku saleysan<br>**261** Foojarka Caawinta Guryeynta Dadkii Ciidamada soo marey (VASH)<br>**100** Foojarka Barnaamijka Mideynta Qoysaska (FUP)<br>**13** Ka qaybqaatayaasha barnaamijka isku filnaashaha ee qoysaska (FSS)<br>**34** Qoysaska ku jira Barnaamijka Foojarka loo yaqaan (Mobility) ama u Dhaqdhaqaaqa Meelaha fursadaha leh | **53%** waa ka qaybqaatayaal caruur ah.<br>**41%** waa xubno qoys oo naafo ah.**15%** dad da’ah.<br>**32%** waxey liisgareyeen in ay tahay Soomaaliya wadanka ay asal ahaan ay ka soo yimadeen<br>**78%** waxa guryaha qoyska hogaan u ah dumar<br>**84%** waa dadka midabka leh.<br>**46%** dad ay xubnaha qoyskooda ay shaqeeyaan.<br>**$15,550** waa celceliska daqliga soo gale dhamaan xubnaha qoyska; Xubnaha qoyska Shaqeeyana waa, **$22,080** |

# MPHA 2018 Qorshayaasha iyo Miisaaniyadda

## Miisaaniyadda oo Kooban

Sanad walba, HUD waxey u qoondeysaa MPHA maalgelin lacageed oo cayiman. Si kastaba, Kongareska wali ma gudbin qoondooyinka sharciga maalgelinta sanadka 2018 waana laga yabaa in la yareeyo cadadkaas ayada oo qayb ka ah miisaaniyada dawlada dhexe. Sanadka 2018, MPHA waxay saadaalineysaa in ay HUD siin doonto 97 boqolkiiba lacagta HCV ama foojarada, 75 boqolkiina lacagta lagu maamulo iyo 63 boqolkiiba lacagta dayactirka dhismayaasha-Qiyaaasta wadarta khasaaraha waa ku dhawaad $6 milyan ee guud ahaan kabitaanka dawladda dhexe.  Sidii sanadiihii hore, MPHA waxey raadineysaa waxtar iyo dhawrid si loo hubiyo in aan u sii wadno bixinta guryeyn lagu noolan karo oo ammaan ah qoysaska ku jira mashruuceena.

Sanadkii 2018, MPHA waxey qorshaysey si taxader leh anaga oo maleyneyna in maalgelinta HUD in ay ka yaraaneyso tii nala siiyey sanadkii 2017. Miisaaniyada MPHA ee 2018 waxey fileysaa $97 milyan ilo dhaqaale iyo $99 milyan isticmaalka, inaga oo ka isticmaaleyna $2 milyan kayda MTW ee MPHA si aan ugu daboolno baahida. Barnaamijka MTW, MPHA waxey isku keeni kartaa ilo daqli kabitaano ee meelo kala duwan ka yimid, sidii sanadii horena, waxaan isticmaaleynaa lacag ka keeno HCV (Barnaamijka Foojarka) si aan ugu kabno qaybahaha aadka

maalgelinta looga yareeyey sida guryeynta dadwaynaha (Public Housing). Ayada oo ay meesha ka maqan tahay ilo kale oo maalgelineed, iyo yareynta mustaqbalka ee maalgelinta dawlada dhexe, waxey keeni kartaa isticmaal weyn ee kaydka, yaraansho addeega qoysaska, iyo in la yareeyo shaqaalaha MPHA.

**Miisaaniyada 2018 ee MTW**

| | Qarashka Hawlgalka Guryeynta Dadwaynaha | MTW Gureynta Ikhtiyaarka Foojarada qofka meeshuu rabo ku dagi karo | Barnaamijka Lacagta Loo qoondeeyey Dayactirida Dhismayaasha | MTW Hawlaha MTW | Wadarta Guud ee Kharaskha ee MTW |
|---|---|---|---|---|---|
| Illaha Daqliga | 41,178,000 | 45,159,000 | 10,623,000 | | 96,960,000 |
| Isticmaalka | 43,899,000 | 44,172,000 | 10,623,000 | 287,000 | 98,981,000 |
| Isha Barnaamijka tirada Saafidda ah (Kaydka) | | | | | (2,021,000) |

## Barnaamijka Gureynta Dadwaynaha Public Housing Program



Marka ay noqoto barnaamijyada guryeynta dadwaynaha daqligoodu-yaryahay (LIPH), qorshayaasha iyo aragtida MPHA waxaa qaabeya labo xoog oo aan isbadaleyn: Hawsha hadafkeena (mission-keena) ah in aan siino guryeyn dadka daqligoodu yaryahay, iyo mida dareenka calaamada leh ee ah taageerida maaliyadeed ee dawlada dhexe ee hawsheena. Boqolkiiba hal guryeynta dadwaynaha ee Mareykanka oo u dhiganta ku dhawaad-10,000 guri-ayaa xariiqda ka baxa sanadwalba sababtoo ah lacag ku filan oo ay helin ee lagu sii wado dayactirka iyo dib-u horimarinta. MPHA waxey ku faantaa in ay baalmarto jihadaan sanadwalba sanadka ka dambeeya, mana rabno haatan in aan ku biirno.

Isku dhafka hantida guryaha MPHA waa kuwa duq ah waxeyna qabaan baahi weyn. 42 dabaqyadda saraha dhaadheer waxey celcelis ahaan jiraan 50 sano; qaar badan oo ka tirsan guryaha magaalada ku firirsan waa kuwo wali duq ah; guryo magaaleedkeena qoysaska taariikhdoodu waxey ka soo bilaabataa 1952. Dabaqyo badan, kaabayaasha iyo nidaamyada dhismaha sida kuwa farsamadda, tubooyinka, iyo korontada, waxey dhaafeen inta loogu talagey in ay noolaadaan. In kastoo MPHA ay aad u shaqeyso si ay u sii wadi lahayd howsha dayactirka guryaha, hadana caqabadaha muhiimka oo qaali ah way adag tahay in la arko balse sanad walba way sii kordhaan. Baahida hantida guryaha ee degdega ah waxey gaaraysaa $127 doolar oo milyan sanadka 2017, hadana HUD iyo Kongareska waxay bixiyaan $10 milyan sanadkiiba. La'aanta maalegelin aan ku filnayn dayactirka iyo horumarina waa weyn dartood, MPHA waxey qiyaaseysaa in ay u baahnaanto $520 milyan sanadka 2037.

Hawlaheena la xariira MTW ee sanandka 2018 waxey u jeedkiisu tahay hadafka ah dhawrida iyo kobcinta guryaha xiliga ilaha khayraadku uu yaryahay oo waliba inaga oo taageerayna tayadda noolasha degeneyaalka.

### Hawl-qabadyada Ugu Muhiimsan Sanadka 2018

**Dhawrida Hantida** – Waa muhiim in ay MPHA sahmiso xeeladaha dhawrida hantida si loo dhawro guryeynteena, loona si wado hantidaan bulshadeedka loona taageero tayadda noolasha degeneyaalka. Si waafaqsan, sanadkii 2017, MPHA waxey bilowdey eegid hantida si qoto leh si ay u go'aamiso wadiiqada ugu wanaagsan ee lagu kobcin karo dhismo walbo loona dhawri karo (ama loo badali karo oo dib-loo dhiso karo)

si ay si mudo dheer ah u isticmaalaan degeneyaalka daqligoodu yar-yahay. MPHA waxey ka baarandegeysaa xeelado maalgelineed ee kala duwan oo la heli karo ay ka mid tahay barnaamijka bandhigidda caawinta kiradda loogu badalo guryeynata dadwaynaha ee loo yaqaan (RAD) ee wasaarada guryeynta HUD, barnaamijka canshuuraha ee gureynta dadka daqligoodu yaryahay loo yaqaan (LIHTC), waraaqaha deynta (bond) iyo amaahda lacageed. Inta aan xeeladahaan laga hirgelin dhismo qaas ah, MPHA waxey la kulmeysaa oo kala hadleysaa xeeladahaan degeyaalka iyo sida loo xirgalinayo.

**Maaligelinta Si loo sii wado Guryeynta Dadwaynaha**– Iyada oo ay jirto dhamaan baahi ah in wada mudnaan lasiiyo, hadana MPHA waxey ku saleyneysaa qorshaheeda qarashgalinta dhismayaasheeda si taxadarleh oo dhawrsan, qoodeynta maalgelinta hantida ah $6.44 milyan sanadka 2018 (oo lagu darey maalgelinta lacagii sanadadii hore). Waxyaabaha mudnaanta la siinayoo waxaa ka mid ah kuwaan soo socda:

- Badalida saqafyada iyo dhajinta guryaha qoyseedka hal-halka
- Dayactir weyn ee horumarineed ee wiishashka dhimayaasha 1710 Plymouth & 1206 2nd Street NE
- Badalid Hufan iyo ku darrida tubooyinka, dayactir hawo-qaadayaasha iyo badilada tubooyinka ama meesah lagu qubeysto ee dhismaha 1515 Park Avenue South
- Saqaf badalida ee dhismaha 3755 Snelling Avenue
- Badalid Hufan iyo ku darrida tubooyinka iyo meesha lagu qubeysto ee dhismaha 2121 Minnehaha Avenue
- Dayactirka Nidaamyada dhismaha-goobaha ay noqodoonaana waa la go'aansanayaa

**Qandaraasyo Waxqabadka Tamarka** - MPHA waxey sii wadeysaa qandaraasyadeeda $33 milyan ee tayada tamarka kuwaas oo taageera dadaalka looga dhigayo dhismayaasheena kuwo leh tayo tamar ee hufan oo wax ku'ool ah. MPHA waxey iskaashi la sameysatey shirkad qandaraasle degeenka ah oo faa'iido doon ahayn is loo awood loogu siiyo gaarsiinta lacagta $73, 000 oo ah qoondooyinka dawlada dhehe in ay sameyso horumarin xaga tamarka ku sameyso sideed guri ee ku yaal guryo-magaaleedka Glendale. Waxaana sahmineynaa fidinta dadaalkaan sanadka 2018.

**Guryo-magaaleedka Minnehaha**- MPHA waxey mardhaw dhiseysaa dhismo ka kooban 16-cutubyo guryahaha dadweynaha. Waa cutubyo guryo ah oo labo qol, sadex qof, iyo afar qol ka kooban, waxeyna hooy unoqonayaan qoysaska caruurta leh oo ka imaaada meelaha dadka guryo la'aanta ay si kumeel gaar ah ku jiraan(Shelters). Meesha ay ku yaalaan waa meel ku haboon gadiidka dadweynaha ee tareenka fudud waxeyna ku yaalaan meel ka baxsan meela faqriga ku aruurey. In anaga oo iskaashi la sameysaneyna magaalada, gobolka iyo hay'adda khayriga ah, MPHA waxey wadeysaa raadinta fursadaha lagua balaarin karo isku dhafka guryeynteena.



*Bandhiga Guryo-Magaaleedka Minnehaha*

## Foojarada Qofku Meeshuu Rabo uu Ku dagi Karo ee Guryeynta

Sanado badan, maalgelintii dowladda dhexe ee waraaqaha foojarka ee Guryenta ee (HCV, oo badanaa loo yaqaan "sekshan 8"), wuxu ahaa mid aan isbadal badan lahayn, taa micneheedu waa in sanadwalba loo qoondeenayey Hay'adda guryeynta isku tiradii hore oo kale sanad walba. Sidaa daraadeed, xoogsaarida MPHA waxey tahay u addeega qoysaskaan si ka fiican. Sidaan, qorshayaasheena 2018 waxey raadinayaan fidinka fursadaha iyo dhaqdhaqaaqa qoysaska aan u adeegno, si ugu dambeyntiina aan u sameyno dejinta iyo farsamaddii aan ku caawin lahayn qoysaska si ay oga kaaftoomaan barnaamijka ama u jebino faqriga iska-daba-wareegsanaya ama soo noqnoqanaya.

Sanadkii tagey waxaa ku jiray qorshaha ballanqaad ah foojarada guriga ku saleysan oo la xusi karo, markii ay noqon lahayd baaxada cabbirka iyo waliba saameynta noolasha dadka da'yarta ah. MPHA waxey ballanqaadey 25 foojaradda in ay noqdaan dhismo ka kooban 40-sariirood ee loogu talagaley dhalinta guryo la'aan ama dib-jirka ee ku nool meelaha u dhaw maagaaaladda hoose (downtown) ee Miniyabolis. Ballanqaadkaas, oo qiimihiisu gaarayo ku dhawaad $4 milyan oo xiliga waqtigiisa hore soconayo ilaa 20 sano, waxey waafaqsan tahay qorshihii MTW ee hore ee MPHA "Guryeynta Joogtada ee Dhalinyaradda".

### Hawl-Qabadyadda Muhiimka Sanadka 2018

Cilmi-baaristu waxay si qancin leh muujineysaa in caruurta uu qoyskoodu haysto foojarka sekshan 8ka hadii ay u guuraan meelo leh fursado dhaqaale ay ka faa'idaan kororka helida daqli kasbashada ee inta ay nool yihiin. Qoysku xataa waxey ka faa'idaan caafimaad horumar leh iyo natiijooyin kale. Sanadkii hore waxaan aragney horumar la xusikaro oo kobcinaya hadafkeena arintaan ah.

**Sharciga Magaalada ee Guryeyn aan Takoor la'aan ah**- Bishii Maarso 2017, Golaha Magaalada Miniyabolis waxey si wada jir ah ugu codeeyeyn in la mamnuuco takooridda guryenta kireynta ee degeneyaalka haysta foojarka. Tilaabadaan waxey dhaqan gali doontaa bisha Juun 2018, waxeyna mar hore dhalisay wadahadal dadka deegaanka oo muhiim ah oo ah qiimaha ay foojaradaan u leeyihiin bulshada iyo caqabadaha badan ee hortaagan isticmaalkooda.

**Wadashaqeyn Gobolka ah iyo Dhaqdhaqaaqa (Mobility)** - Bishii Agoosto, MPHA iyo Hay'adda Family Housing Fund waxey isku yimaadaan oo isku keeneen shir cilmi-baarayaasha qaranka oo ka socdey mashruuca hal-abuurida ee u Guurida Fursadaha loo yaqaan Creating Moves to Opportunity (CMTO), iyo dhammaan hay'adda guryeynta dadweynaha ee gobolka ee magaalooyinka labada mataanood (Twin Cities). Waxaan bilowney wada-hadal ah hababka aan uwada shaqeyn karno in aan u abuurno waxtar kasoo si fiican ugu addeega qoysaskeena, si aan ugu soo bandhigno fursado badan iyo uguuritaanka isdhexgalka meelaha leh fursaddo waa weyn.

## Iska Kaashi iyo Fursaddo Degenayaalka iyo Ka Qaybgalayaasha

Si ka sii xeel dheer, howsha aan asal ahaan u jirno, MPHA waxey sii wadeysaa sahminta iskaashi la sameynta hay'addaha aan faa'ido doonta ahayn ee qabta addeega aadamaha kuwaasoo taageera caafimaadka iyo wanaagiisa, waxbarashada, iyo iskufilnaashaha dhaqaali.

### Hawl-Qabadyadda Muhiimka Sanadka 2018

**Xeeladda Kobcinta Adeegga Saraha Dhaadheer** – MPHA waxey dib-u-eegeysaa addeegeena jira haatan iyo sidii loo dhisi lahaa addeegyo caadi ahaan kawadasiman dhamaan dhismayaasha. Anaga oo la shaqeyneyna

iskaashatada hada jirta iyo kuwa mustaqbalka, MPHA waxey aragti dheer ku aragtaa in saraha dhaadheer noqonayaan meel derisyadu ay ka heli kartaan barnaamijo addeega caafimaadka leh iyo addeega taageerida dadka qabo jiradda maskaxda oo kala duwan.



MPHA waxey sahmineysaa isticmaalka qoondeen lacag iyo dib-u-habeenta goobaha dhismayaalkeeda si loogu daro qaabab barnaamijyo horumarineed oo lagu beegsanyo gooboyin gaar ah.

**Waxbarasho Iyo Tababar Shaqo** –Dadka ka qaybqaata HCV iyo qoysaska degen guryaha dadweynaha oo xiiseenaya in ay gaaraan iskufilnaansho, MPHA waxey la saxiixatey waraaaqo ujeeedkaas ah,hay'addaha Summit Academy, Twin Cities Rise iyo waliba waxey sahmineysaa wada-shaqeyn taa la mid ah in la sameysato iskaashatada kale si loo abuuro fursadooyin waxbarasho iyo shaqo.

MPHA waxey ku talo jirtaa in ay sameyso barnaamij tijaabo ah sanadka 2018 waxeyna raadineysaa iskaashi oo si hufan u taageero qaabka isku-filnaanshaha halkaasoo kabitaanka guryaha iyo rabitaanka barnaamijka waxbarashada ay is wada jir ahaan isku caawiyaan loona dhiiragaliyo qoysaska in ay ku hawlanadaan waxyaabo dhaqaalaha horumariya. MPHA waxey isticmaaleysaa awoodeeda MTW si ay u abuurto kabitaan dabacsan kasoo loo qoondeenkaro ama lagu hagaajinkaro baahida qoysaska ka qaybqaadanaya.

## Hawl-Qabadyadda MTW ee la soo Jeediyey 2018

Madaama aan nahay Hay'ad MTW, MPHA waxey cayimi kartaa meelo ay rabto in hal-abuurto ayna ka sameyso barnaamijyo waxka qabanaya baahida bulshadeeda kuwaasoo waafaqsan sadaxda ujeedooyin ee barnaamijka MTW. Sanadka 2018, MPHA waxey u soo jeedineysaa HUD qorshooyinkaan sida hoos lagu qeexay. Qaar waa kuwo wada cusub, kuwana waxayna ku dhisan yihiin barnaamijyada horey u jirey. (Hawlahaan waxaa si fiican loogu faahfaahiyey Qorshaha dhamaystiran ee aad ka heli karto bogga www.mphaonline.org)

***Ujeedadda Qaanuunka: Doorashada Gureynta (Housing Choice)***

**Fursad iyo Dhaq-Dhaaqaaq(Mobility) oo Gobolka oo dhan ah** – MPHA waxey la shaqeyneysaa mas'uuliyiinta guryeyta oo dhan iyo iskaashatada guryeynta ee kale ee magaalooyinka mataanaha ah si loo balaariyo fursadaha guryeynta dhamaaan qoysaskeen haysta foojarka guryeynta. Dadaaladaan waxaa suurogal ah in ay keenaan soo jeedinta sameynta Hay'add MTW ah ee gobolka.

**Barnaamij Dhiirigelinta Milkilayaasha Guryaha** – Inagoo iskaashi la sameyneyna magaalada Miniyabolis, MPHA waxey abuureysaa lacag qoondo ah(Fund) taas oo dhiirigalineysa oona abaalmarineysa milkilayaasha guryaha ee ka qaybqaata barnaamijka HCV ama foojarka dadku meeshay rabaan ku degi karaan. Lacagtaan waxey u fidineysaa fursadaha guryeynta qoysaska haysta foojarka ayada oo u keeneysa milkileyaal badan barnaamijka.

**Heerarka Bixinta Lacagta (Payment Standards) ee Xaafadaha**– MPHA waxey shaqo-galisey la taliye sameeya baaritaan suuqa ah si loo ogaado suuqo kirada ee heerka habka tirakoobka iyo xaafadaha. Anaga oo ku saleyneyna heerka bixinta lacagaha meelo yar, MPHA waxey u sahleysaa qoysaska haysta foojarka guryeynta awood waxgadasho oo micnaheeda yahay "Awood Guri helid ah" oo weyn si ay ugu guuraan xaafadaha leh kiro sare ama qaali ah, oo lehna fursad dhaqaale oo weyn.

**Dhisida Guryeynta Dadweynaha oo Badan**– Waxaan isticmaaleynaa dabacsanaanta MTW si aan u helno habab hal abuurleh oo aan iskaashi usameyno si loo sameeyo 141 cutubyo guryaha dadwaynaha ah ee inta ugu badan ee cutubyo guri sida u qabo xeerka "Faircloth Authority" oo ay MPHA hadhow kaga heli karto lacag kabitaan dheeraad ah HUD. (Faircloth, waxaa lagu magac darey xildhibaanki aqalka sare dawladda Mareykanka, waxeyna tixraacdaa kaalmada guryaha dadwaynaha ee la heli karo oo MPHA loo ogal yahay, oo leh suurogalnimo ah kororka guryaha la kabo).

***Ujeedadda Qanuunka Qoran: Isku-Filnaansho***

**Guryeyn Ujeedkeedu-Hadaf leh -(GO!) Housing** – Tani waa barnaamij ikhtiyaari ah oo u furan guryeynta Dadwaynaha (Public Housing) iyo ka qaybgalaayaasha barnaamijka foojarka HCV, wuxuu siinayaa waxabarasho ballaaran, tababar, iyo fursado shaqo iyadoo la kaashanaya iskaashato aan faa'ido doon ahayn ee dhanka waxbarashada iyo farsamada shaqada. Dhiirigelintu waxaa ka mid haddii aad aruursato lacag in intii aad aruursato oo kale lagu dari doono iyo waliba kabid dabacsan.

**Waxbarasho ah Guryaha Dadweynaha iyo Iskaashato Tababarida**– MPHA waxey la shaqeyneysaa iskaashatooyin kala duwan si meel loogu qoondeeyo cutubyadda guryaha ee u dhaw goobaha waxbarashada oo loo kaydindoono dadka ka qaybqaata barnaamijyadaas. Kaqaybgalayaasha waxey ku noolaanayaa guryaha oo bixinayaan kirada guryaha dadweynaha (30 boqolkii daqligooda) inta ay ku jiraan barnaamijka.

***Ujeedadda Qanuunka Qoran: Qiimeyn Kharashka Waxtarleh***

**Dib-Uqeexida Daqliga Barnaamijka** – Xiligan, MPHA waxaa ka soo galo ku dhawaad $500,000 oo daqli ah kireynta meelah dusha saqafyada dabaqyadda, goobaha dadka ka dhaxeeyo ee la kireysto, iyo ilooyin daqli oo kale. Daqligaan waxaa la iskugu uruurinayaa meel dhexe, waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo in wax looga qabto baahida dayactir ee weyn ee guryaheena dadwaynaha.

**Fasixida "Qoraalka Bayaanka Aaminaadda" (Declaration of Trust) ee guryaha si loo dhawro guryenta Dadwaynaha—**Dhaxalkii HUD's ee habka Qoraalka Bayaanka Aaminaadda oo loo yaqaan Declaration of Trust (DOT) kasoo xukuma hantida guryeynta dadwaynaha wuxuu ka joojinaya awooda MPHA ay kaga aruurin lahayd lacag ilo dhaqaale oo kale oo loo baahan yahay si dib loo maalgeliyo guryeynteena dadwaynaha ee isku dhafan. Ku badalida DOT isticmaalka Heshiiska dhulka Xadidan ee loo yaqaan Land Use Restriction Agreements (LURAs) wuxuu siinayaa MPHA dabacsanaan loo baahan yahay ay ku heli karno lacag iyada oo dhawreysa guryo kiradooda la awoodikaro ee mudo dheer ah.

**Dib u eegista/cusbooneysiinta daqliga ee labadii sanaba mar** – Hadda dadkii aan waa-yeel iyo naafo ahayn ee degen guryeynta dadwaynaha waa in ay cusbooneysiiyaan daqligooda sanadwalba. MPHA waxey yareyneysaa xaddiggan oo ay ka dhigeysaa sanad dhaaf. Tani waxey ka yareyneysaa culeyska degeneyaalka iyo maamulka MPHA.

**Xadadka Cadeynta Hantida Sare-**– MPHA waxey badaleysaa qeexidda daqliga sanadlaha si meesha looga saaro hantida lagu qiimeyey $50,000 iyo wixii ka yar. Tani waxey ka yareyneysaa culeyska waraaqaha iyo warbixin dhiibidaa degeneyaalka iyo MPHA.

**Badelida Cutubyada Guryaha MHOP in laga dhigo Foojarka ku Saleysan Guryaha/Mashruuca**– Sida ay tahay Barnaamijka Fursadaha Guryeyta ee Gobolka ee loo yaqaan Metropolitan Housing Opportunity Program (MHOP), MPHA waxey maalgelisaa 112 cutubyo guryo dadwaynaha ee ku yaal 17 magaalood ee kaladuwan gobolka. MPHA mana laha, mana maamuusho guryahaan. Haddii loo badalo guryahaan mashruucyda foojarka

kusaleysan guryaha (PBVs), waxey keeneysaa isbadal yar ee degeneyaalka, laakiin waxey ka yareyneysaa culeyska maamulka maalgelinta ee labada marka ay noqoto milkilayaasha guryaha iyo MPHA.

**Barnaamijka Foojarada ee Guriga ku saleysan oo aan lala guurguurikarin ee Gudaha-** Si aan u fududeyno waxqabadka kale ee kor ku cayiman, MPHA waxey horumarineysaa oo hirgalineysaa barnaamij iyadu leedahay ee Foojarka Guryaha ku Saleysan ee gudaha ah.

*Faahfaahin dheeraad ah ee qorshooyinka MPHA ee sanadkal 2018, fadlan tixraac qabyo-qoraalka dhameystiran ee bogga internetkeena* www.mphaonline.org*.*